



Tilmaamaha dugsiga hoose dhexe ee ku saabsan Covid-19

Dugsiyada kamuunka Hällefors ku yaala ayaa masuuliyiinta horey ugu wargaliyey waxyaabaha khuseeya covid-19, iyadoo lagu saleynaayo talooyinka ay bixinayaan Folkhälsomyndigheten, xakameynta infegshanka ee gobolka iyo hay'ada waxbarashada, ee taariikhda 2 iyo 4 Noofembar 2020.

Macluumaadkani waa mid shaqeynaaya marka laga reebo isbedelka ay hadda Folkhälsomyndigheten ku sameysay inuu khuseeyo ardayda ay qoysaskoodu covid-19 qaadeen.

Waxa ay Folkhälsomyndigheten hadda bedeshay talooyinka loo soo jeedinaayo ardayda uu masuulkoodu covid-19 qaaday inay guriga joogaan oonay dugsiga imaanin. Dugsiyada ayaa sidaas daraadeed doonaaya inuu masuuliyiinta tan ogeysiyo:

Xitaa carruurta yaryar iyo ardeyda la nool qof covid-19 qaba ayaa loo soo jeedinayaa inay guriga joogaan, sida ardeyda waaweynba loo soo jeediyay inay guriga joogaan. Waxay Folkhälsomyndigheten ay hadda ugu beddeshay talooyinka ay soo jeedinayso si shaqaalaha dugsiga iyo xanaanada jooga ay awooda ugu saaraan shaqada wax barista.

Dugsiga hoose dhexe iyo noocyada kale ee dugsiyada qasabka ah iyo dugsiga xanaanada ayaa muhiim u ah horumarka iyo waxbarashada carruurta. Dugsiga iyo xanaanada labaduba waxay bulsadha u qabtaan hawl muhiim ah. Waxa sal u ah cudurka aafada waa in waxqabadku uu mid furan ahaado oo ay waxbaristu dugsiga ka dhacdo.

Cudurka aafada ah ee covid-19 waxa uu keenay culeys weyn oo saaran waxqabadka dugsiga, kuwaas oo sidoo kale aad uga dadaalay si ay waxqabadka ugu beegaan si halista faafitaanka cudurka loogu yareeyo. Waxa ay Folkhälsomyndigheten hadda isbeddel ku sameynaysaa talooyinka/waxyaalaha ay soo jeedinayso xeerarka hab dhaqanka ee xiriirada qoysku leeyahay taas oo ah tilmaamaha raad gurida infegshanka oo la cusbooneysiisay: xitaa carruurta aan calaamado laheyn ee ku jira dugsiga xanaanada iyo dugsiga hooseba waa inay guriga joogaan haddii qof qoyska ka tirsan laga helo covid-19. Waxa talo bixintii hore ay ugu khusaysay ardayda waaweyn, sida ardayda dugsiga sare dhigata.

Folkhälsomyndigheten uma aragto inay talaabadani wax saameyn ah oo weyn ku yeelan doonto faafitaanka infegshanka ee ka dhaceysa dugsiga ama guud ahaan bulshada dhexdeeda.

-Isbedelka ujeedadiisu waxa weeye in la abuurto deganaansho iyo degaan buuq yar oo shaqada ku fiican, iyo in la suurto galiyo in diirada la saaro shaqada habka waxbarista ee dugsiga.

Waxa ay Folkhälsomyndigheten dooneysaa inay carrabka ku adkeyso faafintaanka fayruska carruurta faafiso ee hooseeya iyo inay carruurta guud ahaan calaamado khafiif ah yeeshaan oo aanay aheyn qaar wada faafida fayruska, inay tahay mid sii jirta. Shaqaalaha dugsiga hoose dhexe ayaan sidoo kale laheyn khatar ka weyn oo in covid-19 laga helo ah marka loo eego xirfadleyda kale.

[Carruurta aan calaamadaha laheyni waa inay guriga joogaan haddii qof qoyska ka mid ahi uu qabo covid-19 — Folkhälsomyndigheten \(folkhalsomyndigheten.se\)](#)

Dugsigu waxa uu si isdaba joog ah ugu raacayaa awaamiirta iyo tilmaamaha iyo talaabooyinka wax cusbooneysiinta iyo macluumaadka si joogto ah uga soo baxaaya dowlada. Waxyaabaha kor ku xusan ayaa shaqeyn doona illaa ogeysiis dambe.

*Maamulka dugsiga
Dugsiyada hoose dhexe ee kamuunka Hällefors*